

BARASHADA & DEJINTA CHROMEBOOK

Chromebook waa laptop sahlan oo ku shaqeeya nidaamka ay wax ku shaqeeyaan ee Google Chrome. Kambiyuutaradani waxaa loogu talagalay in la isticmaalo inta lagu xiran yahay internet-ka. Si aad u dejiso Chromebook aad leedahay waxaad u baahan tahay khadka Internet-ka. Ka hor inta aadan bilaabin, waxaad u baahnaan doontaa in aad ogtahay magaca WiFi ama Nidaamka Internet-ka iyo password-ka aad rabto in aad ku xiranto.

1. Daarista Chromebook

Ku xir xariga buuxinta beetariga si aad buuxiso aaladaada oo daar adiga oo cadaadinaya badhanka wax laga daaro.




Badhanka wax laga daaro wuxuu ku yaalaa dhinaca geesta midig ee sare.

2. Dejinta Chromebook aad leedahay

Marka u horreeya ee aad daarto aaladaada, waxaad arki doontaa astaanta Chrome. Marka daaqaada Soo dhaweyntu soo muuqato, riix badhanka buluuga ah ee 'Aynu hore u sii socono' **Let's go**.


Ka bilaw adiga oo dooranaya luqadaada. Waxaad sidoo kale dooran dartaa qaabka keyboard-kaaga si aad u waafajiso nidaamkaaga ama luqadda aad doorbidayso. Haddii loo baahdo, daar meesha laga maamulo gelida 'accessibility settings' adiga oo dooranaya badhanka buluuga ah ee Gelida.



Riix badhanka buluuga ah ee 'Aynu hore u sii socono' **Let's Go** si aad u sii wado

3. Riix nidaamka aad rabto ee ku yaala shaashada Ku xirnow Nidaamka


Marka xiga, riix liiska hoos loo sii gelayo ee 'Fur Nidaamka' **Open the Network** oo dooro magaca nidaamka aad rabto in aad ku xiranto. Magacyada nidaamyada kale ee aad arki karto ee dhow nidaamyada guriga ama ganacsiga-iska dhaaf kuwaasi. Daaqad soo baxaysa ayaa la arki doonaa. Gali password-ka Wi-Fi aad leedahay oo riix Isku xir. Marka Chromebook aad leedahay ku xirmo Internet-ka, riix badhanka 'Sii wad' **Continue** ee ku yaala halka hoose ee daaqaada 'window'.



4. Gal Koontadaada Google

Gal Chromebook aad leedahay adiga oo adeegsanaya koontadaada Google ee rasmiga ah ama samee koonto haddii aadan lahayn mid. Sameynta koonto waa mid fudud, fiiri tilmaamaha la raacayo ee ku qoran bogga xiga. (Ogow: Koontadani ayaa loo sameyn/dejin doonaa in uu yahay midka rasmiga ah waana koontada kaliya ee beddeli karta meelaha wax laga maamulo ee Chrome qaarkood).

- Koontooyinka Google waa albaabka laga galo istimaalka Chromebooks si hab buuxda looga faa'iideysto. Waxaa dhici karta in aad isticmaasho qaabka martida 'guest mode' marka waqti la joogaba, haddii uu qof kaa deynsado laptop-kaaga. Chromebooks waa mid ku shaqeeya koonto iyada oo dhammaan adeegyada Google ay ku xiran yihiin koontooyinka qofka, taasi oo sahlaya in kambiyuutar la wadaago sababta oo ah macluumaadka koonto kastaa waa mid gooni ah.



Gal haddii aad hore u lahayd koontada Google amd Gmail

5. Sameynta Koontada Google

Marka hore riix halka ay ku qoran tahay 'Kala doorashooyin badan' **More Options** ka dibna bixi macluumaadka aasaasiga ah ee soo socda:

- Gali magacaaga
- Gali username-kaaga.
- Dooro password ay adag tahay in la iska qiyaaso.
- Gali taariikh aan la sii cayimin 'random' haddii aad doorbidaysa in aadan sheegin taariikhdaada dhalasho.
- Waxaad galisaa lambarkaaga telefoonka iyo email kale haddiiba ay dhacdo in aad ilawdo password-kaaga oo aad u baahato in aad dib u dejiso. Macluumaadkani waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa in uu koontadaada ka dhigo mid ammaan ah haddiiba ay jiraan dhaqdhaqaaqyo aan caadi ahayn. *Lagaagama baahna in aad galiso macluumaadkani.*
- Dib u eeg Shuruudaha Dhanka Adeega iyo Siyaasada Gaar Ahaanshaha waxaanad calaamadeysaa sanduuqa si aad u aqbasho.

6. Soo dhowow!

Ka dib marka aad sameysatid koontadaada waxaad arki doontaa bogga soo dhaweynta Google oo sharraxaya waxyaabaha aasaaska u ah koontadaada.


Marka aad gasho waxaa lagu siin doonaa shuruudaha dhanka adeega ee Google Play, halkaasi oo aad ka dejin karto oggolaanshaha iyo waxyaabaha la doorbidayo ee loogu talagalay aaladaada. Wuxuu ku weydiin doonaa haddii aad jeclaan lahayn in aad joojiso keydinta Google Drive. Riix halka ay ku qoran tahay 'Waxyaabo badan' **More** iyo 'Goobta Isticmaal' **Use Location** (halka app-ka iyo adeegyadu isticmaalaan goobtaada Chromebook). Kuwani waxaa ku taliyay Google si looga faa'iideysto awoodiisa buuxda. Taabo 'Aqbal' **Accept** marka aad dhammeystirto.

Meesha laga maamulo adeegyada Google, oo ay ku jiraan goobta iyo kala doorashooyinka wax keydinta 'backup', riix badhanka buluuga ah ee ay ku qoran tahay 'Aqbal' **Accept** si aad u sii wado.


Dejinta nidaamkii bilawga ahaa waa la dhammeystiray, tallaabada u dambeysa ee ikhtiyaariga ay tahay in la doorto waa doorashada in aad ku soo wareegto Chromebook aad leedahay. Raac tallaabooyinka ku soo wareega, waa mid dhakhso badan oo macluumaad laga helayo. Haddii aadan rabin, ka dib waxaad riixi kartaa halka ay ku qoran tahay X ee ku taala dhinaca geesta midig ee sare.

Su'aalaha?


Si loo helo taageero dheeraad ah, email u dir: **connectingportland@portlandoregon.gov**




Riix 'Kala doorashooyin badan' **More Options** si aad u sameyso koonto cusub




Gali magaca, cinwaanka email-ka ee la rabo, iyo password-ka




Gali macluumaad ikhtiyaari ah iyo taariikhda, ka dibna riix 'Midka xigta' **Next**



Riix badhanka 'Waan ku raacsanahay' **'I agree'** si aad u sii wado



Meesha laga maamulo adeegyada Google oo ay ku jiraan goobta iyo kala doorashooyinka wax keydinta 'backup', riix badhanka buluuga ah ee ay ku qoran tahay Aqbal **'Accept'** si aad u sii wado



Riix badhanka buluuga ah ee ay ku qoran tahay 'Ku soo wareeg' **Take a Tour** si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan qaababka Chromebook